



# Hannaanka Iskaashiga Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Janaayo, 2025  
Muqdisho

## Gogoldhig

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS) ee kala ah; Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF) sida Puntland, Jubbaland, Koonfur-galbeed, Galmudug, iyo Hirshabeelle waxa ay wada galeen Hannaan Iskaashi kaas oo lagu magacaabo (Hannaanka Iskaashiga Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS) oo ujeedadiisu tahay;

1. Qaabeynta wadashaqeynta Labada Heer si loo xaqiijiyo in si wax-ku-ool ah la isaga kaashado kor joogtaynta iyo ilaalinta Maamulka Maaliyadda dalka iyo dhowrista hantida danta guud.
2. In loo wada shaqeeyo si waxtar leh, iyada oo la ixtiraamayo awoodaha Xafiisyada Labada Heer si waafaqsan Shuruucda Dalka iyo Halbeegyada Caalamiga ah.

## Hordhac

Iyada oo laga duulayo ahmiyadda Hay'adaha Hantidhowrista ee xoojinta hufnaanta, daah-furnaanta, isla xisabtanka iyo dowlad-wanaagga ayey Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS isku af-garteen in ay adkeeyaan wada-shaqaynta Labada Heer, si loo xoojiyo ilaalinta Maamulka Maaliyadda, hantida danta guud iyo hirgelinta halbeegyada baariseed guud ahaan Dalka.

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku shaqeynayaan shuruucdooda gaarka ah, balse Hannaanka Iskaashiga ee Labada Heer ayaa hagaya howlgelinta baarista wadajirka ah, qeexista awood-wadaagga iyo doorka labada heer, si kor loogu qaado kor joogtaynta, iyada oo la ixtiraamayo madax-banaanida Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.

Hannaankan waxa uu abuurayaa gudashada waajibaadka si wadajir ah, tayeynta awoodaha labada heer, sare u qaadista baarista hantidhowrka iyo dhiiragelinta isla xisaabtanka si loo ilaaliyo hantida ummadda.

## Ujeedooyinka

Ujeedooyinka ugu waaweyn ee Hannaanka Iskaashiga Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxaa kamid ah:

1. Hirgelinta wadashaqeynta, isku-dubaridka iyo fulinta baarista wadajirka ah ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.
2. Habka wadaagista macluumaadka
3. Dhisidda xirfadaha iyo hormarinta Xafiisyada Labada Heer
4. Hagista xariirka daneeyeyaasha iyo wadashaqaynta Baarlamaanka.
5. Mideynta Sharciyada iyo Warbixinnada Baarista Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS;
6. Isku-xirka deeq-bixiyeyaasha iyo Hay'adaha shaqo wadaagga la ah Xafiisyada Hantidhowrka Guud.
7. Xallinta khilaafaadka ka dhalan kara wadashaqeynta Labada Heer.

ANE  
MAC



Bogga 1 - 7



AAM

## I. Hawlaha Baarista

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in ay fuliyaan hantidhowris wadajir ah arrimaha ku saabsan awoodaha wadaagga ah oo ay ka mid yihiin;

### A. Baarista mashaariicda laga helo deeq-bixiyeyaasha

- Baarista Mashaariicda laga fuliyo dhanka Dowladda Federaalka ayna ka faa'iideystaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxaa baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS, iyada oo XHG u dirayo koox Hantidhowrayaal oo ka socota Xafiiska Hantidhowrka Guud isla markaana waxaa baarista kala qeyb qaadanaya shaqaalaha Xafiisyada Hantidhowrka DXDF ka tirsan, si ay u caawiyaan kooxda baarista wadda, iyada oo ogeynsiin la siinayo Hantidhowreyaasha Guud ee DXDF hawlaha baarista mashaariicda socda;
- Dhammaan warqadaha maamulka iyo warbixinnada baarista mashaariicda laga fuliyo dhanka Dowladda Federaalka waxaa dib-u-eegis iyo tayo hubin ku sameynaya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS isla markaana waxaa saxiixaya Hantidhowraha Guud;
- Baarista Mashaariicda laga fuliyo dhanka DXDF waxaa baaraya Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF;
- Dhammaan warqadaha maamulka iyo warbixinada baarista mashaariicda laga fuliyo dhanka DXDF waxaa dib-u-eegis iyo tayo hubin ku sameynaya Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF, isla markaana waxaa saxiixaya Hantidhowraha Guud ee Dowlad-Goboleedka.

### B. Baarista lacagaha kabka miisaaniyadda iyo lacagaha Dowlada Federaalka ay u wareejiso DXDF

- Dhamaan Lacagaha Kabka Miisaaniyadda iyo lacagaha Dowladda Federaalka ay u wareejiso DXDF, Xafiiska Haantidhowrka Guud ee JFS ayaa Hantidhowris ku sameyn kara Kharashaadka iyo sida loo isticmaalay, sidoo kale, waxa uu weydiisan karaa Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Xisaab-celinta Kharash bixintaas iyo dalabka kharash bixinta xigta si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guude ee JFS;
- Lacagaha Kabka Miisaaniyadda iyo lacagaha Dowladda Federaalka ay u wareejiso DXDF, Xafiisyada Haantidhowrka Guud ee DXDF waxa ay ku baari karaan baarista war bixin Maaliyadeedka sanadlaha ah ee ay sameeyaan, isla markaana waxa ay ka soo codsan karaan Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Federaalka xaqijinta kharash bixinta (third party confirmation) marka ka ay u baahdaan, iyada oo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS uu ka caawinayo wixii fududeyn ay u baahdaan.

### C. Baarista Gaarka ah ee mashaariicda ay bixiyaan deeq-bixiyeyaasha ayna ka faa'iideystaan DXDF

- Baarista Gaarka ah ee Mashaariicda laga fuliyo dhanka Dowladda Federaalka ayna ka faa'iideystaan DXDF, waxaa si wadajir ah u baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF, iyada oo uu saxiixayo warbixinta Hantidhowraha Guud ee JFS;

AVE  
MAC

Bogga 2 - 7

AP

AAM

- Dhammaan warqadaha maamulka iyo warbixinada baarista Gaarka ee mashaariicda laga fuliyo dhanka Dowladda Federaalka waxaa dib-u-eegis iyo tayo hubin ku sameynaya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS isla markaana waxaa saxiixaya Hantidhowraha Guud;
- Baarista Gaarka ah ee Mashaariicda laga fuliyo dhanka DXDF waxaa baaraya Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF;
- Dhammaan warqadaha maamulka iyo warbixinada baarista Gaarka ah ee mashaariicda laga fuliyo dhanka DXDF waxaa dib-u-eegis iyo tayo hubin ku sameynaya Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF, isla markaana waxaa saxiixaya warbixinta Hantidhowrada Guud ee Dowlad-goboleedka.

#### **D. Baarista waxqabadka mashaariicda ee deeq-bixiyeyaasha ayna ka faa'iideystaan DXDF**

- Baarista waxqabadka mashaariicda laga fuliyo dhanka Dowladda Federaalka ayna ka faa'iideystaan DXDF waxaa si wadajir ah u baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF, waxaana saxiixaya warbixintooda Hantidhowraha Guud ee JFS.

#### **E. Hubinta Kharash bixinta (Expenditure Verification)**

- Hubinta kharash bixinta (Expenditure Verification) waxaa baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS, iyada oo wargelin la siinayo Hantidhowrayaasha Guud ee DXDF.

#### **F. Baarista Hay'adaha Federaalka ee xarumaha ku leh DXDF**

- Baarista hay'adaha Heer Federaal meel kasta oo ay ku yaalaan waxaa baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS.
- Baarista hay'adaha xarumaha ku leh DXDF iyo hawlaha ay wadaagaan Labada Heer waxaa si wadajir ah u baaraya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud DXDF, iyada oo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS uu hugaaminayo.

Hannaanka loo qabanayo baaritaannada wadajirka ah waxaa faahfaahinaya Sharraxaadda Shaqada (ToR), taas oo loo diyaarinayo, laguna heshiinayo Labada Heer. Dukumentigan waxa uu ka koobnaanaayaa qodobbada muhiimka ah sida istiraatiijiyadda iyo qorsheynta baarista, kooxaha ka qeyb-galaya, diyaarinta warqadda hawl-gelinta iyo maamulka, iyo soo saarista warbixinnada baarista.

## **II. Wadaagista Macluumaadka**


Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in ay wadaagaan macluumaadka si sare loogu qaado wax-ku-oolnimada baaritaannada iyada oo ay soo hoos gelayaan arrimahaan:

- Isweydaarsiga Caddeymaha ee Labada Heer ee Xafiisyada Hantidhowrka, gaar ahaan sugidda lacagaha Xukuumadda Federaalku u wareejiso DXDF ee khuseeya baaritaannada Sanadlaha ah iyo kuwa kale ee Labada heer.

ANE  
MAC



Bogga 3 - 7



AAm

- Wadaagidda Qorsheyaasha baarista iyada oo maanka lagu hayo qiimeynta khataraha inta lagu gudda jiro diyaarinta baarista sanadlaha ah ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.
- Abuuridda maddal lagu wadaaggo macaluumaadka, taas oo ujeeddadeeda ugu weyn tahay in hawlaha Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS la waafajiyo halbeegyada, hageyaasha, warqadaha shaqada, hannaanka hirgelay iyo arrimaha kasoo kordha dalka iyo guud ahaan hay'ad gobolleedyada (regional bodies).
- In la yeesho wadashaqeyn dhow sida wadaagista macluumaadka iyo fududeynta qabashada shaqooyinka baarista gaarka ah ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Laba Heer ee JFS, sida baarista fatashka iyo waxqabadka hadii loo baahdo.

### III. Horumarinta Hay'adaha Iyo Dhismaha Awoodaha

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay isla qaateen in ay sameyaan dadaalo wadajir ah oo lagu horumarinayo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS. Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waxa uu qaadanayaa dowlada u qareemidda baahiyaha Xafiisyada Labada Heer.


Muhiimad gaar ah in la siiyo dadaalada mideysan ee Horumarinta Tayadda Xirfadeysan, taas oo uu Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS ka qaadanayo dowlada hogaamineed in lala kaashado taageerada INTOSAI, ARABOSAI, AFROSAI, AFROSAI-E iyo IDI meelihii looga maarmi waayo. Sidoo kale Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay wadaagayaan aqoon is weydaarsi iyo xirfad wadaag, markii loo eego baahiyaha iyo qorshe-sannadeedka, loona heli karo qoondo miisaaniyadeed.


Sameynta koox farsamo (technical team) oo ka kooban Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS, kuwaas oo sameynaya qiimeynta baahiyaha Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer.

### IV. Xiriirka Daneeyayaasha iyo Taageerada Baarlamaanka

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay si wadajir ah uga wada shaqaynayaan la shaqaynta saamileyda muhiimka u ah shaqada Xafiisyada iyo xoojinta dowlada kormeerka ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud, waxaana ka mid ah:

- **Hormarinta Xiriirka Baarlamaanka:** Dadaallada wadajirka ah ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay diiradda ku saarayaan abaabulka kulamo lala yeesho Guddiyada Maaliyadda ee Baarlamaanka ee Labada Heer, si loogu bandhigo natiijada baaritaannada iyo fulinta talooyinka hantidhowrka iyo xoojinta madax-bannaanida maaliyadeed ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS, si loo hormariyo dowlad-wanaagga iyo isla-xisaabtanka iyo sidoo kale wadashaqeynta Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS iyo Guddiyada Maaliyadda ee Labada Heer ee Baarlamaanka JFS.
- **U-qareemid:** U-ololaynta taageero ballaaran oo laga helo laamaha fulinta iyo sharci dejinta si loo hubiyo hirgelinta talooyinka Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.
- **Isku-xirka Deeq-bixiyeyaasha:** Isku-xirka deeq-bixiyeyaasha si loo mideeyo dadaaladooda kaalmo, loona yareeyo iska hor imaadka hawlaha ay naga taageeraan.

ANE  
MAC  Bogga 4 - 7

 ANM

- **Baraarujinta Daneeyeyaasha:** Kor-u-qaadista fahamka shaqada iyo warbixinnada Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS, sida deeq-bixiyeyaasha, bulshada rayidka ah, warbaahinta, iyo Wasaaradaha, Wakaaldaha iyo Hay'adaha heer federaal iyo heer Dowlad-goboleedba.

#### V. Mideynta iyo Iswaafajinta Sharciyada iyo Warbixinnada Baarista

Si loo xoojiyo daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay isla garteen in ay ka wada shaqeeyaan soo saarista warbixinnada baarista oo mideysan (Harmonized Audit Reports), isku-sidkan, isku-waqtii ah, sidoo kalena waafaqsan sharciyada dalka iyo halbeegyada caalamiga ah. Si loo gaaro arrintan waxaa la isla qaatay in ugu horeyn la mideeyo, lana iswaafajiyo Sharciyada Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.

#### VI. Isku-Duwidda Deeq-Bixiyeyaasha iyo Hay'adaha Iskaashiga

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in Hay'adaha Caalamiga ah ee iskaashiga wadashaqeynta ah la leh XHG ee JFS oo ay ku jiraan INTOSAI, AFROSAI, AFROSAI-E, ARABOSAI iyo IDI iyo intii la mid ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS uu yahay xiriiriyaha mas'uulka ka ah, ka shaqeeyo in Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF ay ka faa'iideystaan, waxna ka helaan fursadaha kala duwan ee laga helo hay'adaas, kuna habboon shaqaalaha Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF.

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in bahwadaagta deeq-bixiyeyaasha ee caawiya sida Bankiga Adduunka iyo Midowga Yurub (EU) iyo kuwa la midka ah wixii taageero ah oo ay bixinayaan la soo marsiiyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS oo mas'uulka ka ah xiriintooda, kadibna ay wada shaqeyn toos ah la yeeshaan Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF.


#### VII. Xallinta Khilaafaadka

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in wixii khilaafaad ah oo soo baxa lagu xalliyo wada-hadal iyo is-afgarad iyada oo la tixgelinayo Sharciyada dalka iyo mabaadi'da guud.

#### Madax-Bannaanida Xafiisyada

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in Xafiis kasta uu u madax-bannaan yahay gudashada waajibaadkiisa shaqo kuna dhaqmayo shuruucdiisa gaarka ah. Tani waa in Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS ku wadashaqeeyaan heshiis ay ku gaarayaan, kuna xaqiijinayaan hormarinta daah-furnaanta, isla-xisaabtanka iyo dowlad-wanaagga iyada oo la qadarinayo madax-bannaanida shaqo iyo mudda sharci ee Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS.

ANG  
MAC



Bogga 5 - 7

 AAM

## **Kormeerka, Warbixinta iyo Dib-U-Eegista**

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay ku heshiiyeen in la qabto kulamo farsamo, si dib-u-eegis loogu sameeyo dhaqangalka heshiiskan, la wadaago dib-u-eegista hawlaha baarista, lana qiimeyo hirgelinta hindisayaasha wadajirka ah. Xafiisyadu waxa ay ku heshiiyeen in sannad kasta la sameeyo dib-u-eegis, si loo qiimeeyo waxtarka wadashaqeynta, soo bandhigidda caqabadaha, lana sameeyo isbeddelka lagama maarmaanka u ah si loo hagaajiyo natiijooyinka.

## **Filashada Hannaanka Iskaashiga**

Heshiiskan si guud waxaa laga filayaa horumarinta wadashaqeynta Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS, si gaar ahna uu xaqiijiyo qabashada hantidhowris wadajir ah oo wadar-oggol ah, in uu bixiyo tilmaamo cad oo ku saabsan sida Xafiisyadu u wadashaqaynayaan, shaqooyinka la wada qabanayo iyo mas'uuliyadaha dhinacyada, taas oo qeyb ka qaadanaysa xoojinta guud ee maareynta maaliyadda dadweynaha, waxtarka baarista oo la kordhiyo iyo hagaajinta maamul iyo isla xisaabtan ee guud ahaan Soomaaliya.

## **Muddada Heshiiska**

Muddada Hannaanka Iskaashiga Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waa saddex (3) sano (2025-2027), taas oo waafaqsan Qorshaha Istaraatiijiyadda Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS. Dhammaadka muddadan Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay sameynayaan dib-u-eegis, si loo diyaariyo Hannaanka Iskaashiga Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS ee kan xiga.

Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Labada Heer ee JFS waxa ay isku raaceen in kulamada sanadlaha ah ee Xafiisyada ay noqoto wareegto oo sanadba meel lagu qabto, iyada oo laga wada hadlayo hab-raaca qabashada kulamadaas.

## **Wax-Ka-Beddelka Heshiiskan**






Hannaankan Iskaashiga ah waxaa wax-ka-beddel ama dib-u-eegis lagu sameyn karaa, marka la helo oggolaansho qoraal ah oo wadajir ah oo ka timaada dhinacyada ku heshiiyey. Wax-ka-beddel kasta waxaa la fulinayaa inta lagu guda jiro diyaarinta qorshaha istaraatiijiyadda cusub ee xigta.

ANE  
MAC

AAM

## Ansixinta

Heshiiskan Iskaashiga ah waxaa dib-u-eegis ku sameeyay ansixiyayna dhammaan wakiillada awoodda u leh ee dhinacyada ku lugta leh, iyadoo lagu saleynayo taariikhda dhaqan-galka ah ee ku xusan dukumiintigan.

Magac	Xilka	Saxiix	Taariikh
<b>Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS</b>			
Avv. Axmed Ciise Guutaale	Hantidhowraha Guud ee JFS		22/01/2025
<b>Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee DXDF</b>			
Xaashi Cusmaan Maxamed	Hantidhowraha Guud ee Galmudug		22/01/2025
Bashiir Maxamed Bahale	Hantidhowraha Guud ee Jubbaland		22/01/2025
Maxamed Cumar Axmed	Hantidhowraha Guud ee Konfurgalbeed		22/01/2025
Axmed Sheekh Nur Iidle	Hantidhowraha Guud ee Hirshabeelle		22/01/2025
Cusman Maxamuud Cali	Hantidhowraha Guud ee Putland		

ANE  
MAC

